



Tacliiqa Madaxweynaha SRCS, Yuusuf Xasan Maxamed,

**Xafladda furitaanka xafiiska SRCS laanta Xuddur
Maajo 4, 2016**

“Aan u sii dhowaano bulshada si aan ugu guuleysano teegeeradooda iyo aqbalaadooda”

“SRCS waxaa dhaqaaifiya baahida loo qabo dhammaan hawlaheeda waxay ku saleysanyihiiin Mabaadii’ida Asaasiga ah”

“Mutadawiciinta Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waa laf-dhabarka jimciyad-Qarameedka waxayna u hawl galaan buundo isku xirta SRCS iyo bulshada”

“Waxaa nahay hay’ad maxali ah, madaxbannaan dhexdhedaad ah qof kasta ayaan u joognaa goob kasta.”

“Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waxay u heelanyahay in ay noqoto jimciyad-qarameed si fiican u shaqeynaya una taagan wax waqabad taxadar gooni ahna siinaya meelaha baahida mudnaanta leh.”

“Ururku wuxuu ku dadaalayaa in uu la shaqeyyo bulshooyinka oo dhan, maamulada deegaanka iyo la-hawlgalayaal kale.”

“SRCS waxay ugu mahad naqeysa ICRC taageerada joogtada ay siineyso dadka Soomaaliyeed mudadii dhibaatada ka jirtay dalka. Laanta Xuddur waa mid ka mid ah tusaalooyinka mashaariicda la taaban karo la hirgeliyey iyadoo taageero laga helay ICRC.”